

### **Bismillaahi Alraxmaani Al raxiim**

Soomku luuqadda carabida waa joojin.

Sharci ahaana waa in ilaahay loogu cibaadeysto joojin la joojinayo cuntada iyo cabista iyo dhamaan waxyaabaha qofka afursiyya oo dhan laga bilaabo markuu waagu uu baryo illaa cadceed dhaca.

#### **Tiirarka soomka**

1- Niyada.

2- iyo in la joojiyo dhamaan waxyaabaha qofka afursiyya.

#### **Qaybaha niyada soomka dhexdiisa**

1- Niyadu waa fararwaxa laga maar maar ah in habeenimada la sii niyaysto soomka fararka ah habeenka waaga barigiisa ka hor waxa sidoo kale ku filan niyada inuu ku xidho soo galista bisha ramadaan halkaa laga niyoonayaa waa qalbiga in lagu dhawaaqaa waa bidco.

2- Niyada salaada sunnada ahi waxay ansaxaysaa saacad kasta oo maalinta ka mida hadii aanuu la iman waxyaabaha qofka afursiyya laakiin waxa loo xisaabinayaa ajarka niyada agteeda.

#### **Qyabha soomka**

1- Mid Waajib ah (Sida Ramadaanta, Kafaaraadka, iyo soomka madarkaa).

2- Mid sunnaa.

#### **Shuruuda uu ku waajibo soomku:**

1- islaamnimo.

2- Caqli.

3- Qaangaadh (ilmaha wax kala sooca waa lagu dhiiri galinayaa soomkaa oo cidda ka masuulka ahi waa amraya).

4- in uu Nagi yahay ( waajib kuma aha soomku qofka musaafirka ah, sida mudan waa in uu soomo hadii aanuu ku adkeyn soomku sida uu sameeyay nabigu CSW waa in uu u dagdago in uu bari yeelo dimmadiisa una fududu qofka qaan gaadhay si uu u gaadho fadligaa bisha ramadaan.

5- Caafimaa.

6- in ay ka madhantahay gabadhu xaydka nifaaska.

### **Xanuunka soomka waa laba qaybood**

1- Xanuun aan la rajayneen bogsashadiisa, waxa la heeeyshiinayaa qofkii waynaa oo kale ee kari kariwaayey soomka laasim kuma aha in uu soomo laakiin maalin kaste wuxuu quudinayaa qof miskiin ah, in uu kulmiyo masaakiin la tiraa intaa uu afuray oo uu casheysiyo ama qadaysiyo, ama in uu kala saaro masaakiinta maalamahaa in la tiraa miskiin kaste oo uu siiyo saac badhkii oo saacii nabigaa (in la miisaan ah kiiloo badhkii iyo toban garaam oo bur ah haku dadaalo in uu mid kaste uga yeelo wax uu ku iidaamsado hilib ama subag.

2- xanuun la rajaynayo bogsashadiisa hadana uu ku adagyahay soomku waxa la heeeyshiinayaa sida gabadhii caadada lahayd iyo nufasada ahayd iyo tii naaska nuujinaysay iyo musaafirkii, waa uu qallaynayaa maalamahaa uu iska afuray hadii uu bogsado hadii uu dhinto inta aanuu caafimaadin ka hor waa loo cafinayaa waanaa ka dhacay soomkaasi.

Waxa lagu sugaa soo galista bisha ramadaan in la arko bisha ama in la dhamaystiro sodonka shacbaan.

#### **Arimaha jabiya soomka**

(waa loo cudur daaraya qofkii jaahilka ahaa iyo kii ilaabay sidoo kale kii lagu khasbay arimahan)

1- cunista ama cabista si ula kac ah, qofka ilaaba soomkiisu wa saxiix.

2- Galmada, hadii ay tahay maalin ramadaan soomkuna uu waajib uu yahay waxa ku laasimaysa kafaaro gudkii waynaa oo ah in uu xoreeyo qoor hadkii aanuu helina in uu soomo laba bilood oo isku xiga hadii aanuu awoodin in uu quudiyo lixdan miskiin.

3- in uu si mubaasharaa iskaga keeno gacantiisa bisha ama in uu qaabilo iyo wixii la mid ah.

4- wixii halka cuntada iyo cabista galaya sida irbadda halka cunnada galaysa laakiin ta kale iyadu ma jabinayso

5- Toobniinka laakiin dhiiga yar ma jabiyo.

6- in uu iska matajiyo si ula kaca

7- In uu soo baxo dhiiga xaydka ama nifaasku.

#### **Arimaha la sunneeyay soomka**

1- suxuurta.

2- in la dib dhigo suxuurta.

3- in la dadajiyo afurka.

4- in lagu afuro rodabka hadii uu waayana timir waa in ay noqoto tiro kala dhiman hadii uu waayo xantoo booyin biyaa haduu waxbaba waayo waxa uu ka niyoonayaa qalbigiisa afur.

5- in uu ducaysto afurka agtiisa iyo markuu soomanyahayba.

6- in uu fara badiyo sadaqada.

7- in uu ku dadaalo salaada habeenkii.

8- Akhrinta qur'aanka.

9- in uu cumraysto.

10- in uu yidhaahdo hadii qof uu dhibo waan soomanahay.

11- in uu baadho habeenka laylatu qadriga.

12- ictikaafka tobanka danbe.

#### **Waxyaabaha la karho soomka dhexdiisa**

1- in uu ku xeel dheeraado luqluqashada iyo sandaarsiga.

2- in uu dhadhamiyo cuntada iyo wax xaajaa jirin.

#### **Waxyaabaha ubanaan qofka sooman**

In candhuufta liqo, in uu dhadhamiyo cuntada dan keensatey awgeed, in uu maydho, in uu cadaydo, in uu is cadriyo, in uu is qaboojiyo.

#### **Waxa xaaraan ka ah qofka soom**

In liqo xaakada laakiin ma jabinayso, dhunkshada uu dhunkado ruux dumar ah ka aan ka aamin ahayn in uu fasahaado soomkiisu iyo hadalka xun (waa in uu sameeyo oo kale ficilka xun oo dhaan) jahliga (ama dulqaad la'aanta, ama in uu xidhiidhiyo soomka oo uu afuriwayo laba maalin oo dhan).

### Soomka sunnada ah:

1-soomka lixda cisho ee shawwaal,qofka dhamays tira bisha ramadaan,waxaana mudan in la is raaciyo isla maalinka labaadba.

2- Soomka maalinta carafa qoofka aan xaajiga ahayn.

3-Soomka maalinka caashuura,iyo maalinka sagaalaad ill koobiyo tobnaadal.

4- Soomka maalinta isniinta iyo khamiista,isniinta ayaanaa sii xoog badan.

5-in laga soomo bil kaste saddex cisho waxaanaa fadli badan in ay noqdaan maalmaha ayaamu biidka (13-14-15) .

6-in maalinna la soomo maalinna la afuro.

7-Soomka bisha ilaahay ee muxarram.

8-Soomka sagaalka dul xijja.

9- Soomka bisha shacbaan laakiin lama dhameystirayo.

### Soomka la Karhay

Jumcaha iyo sabtida Axaddana waa la karhaa in lagu gaar yeelo laakiin hadii uu ku gaar yeelo sabab jirta awgeed lama karho sida maalinta carafo oo kale .

### Soomka xaaramta ah

1-in lagu gaar yeelo bisha rajab soom.

2-Soomka maalinta shakiga laakiin hadii uu soom Hore soo soomi jiray wax dhiba maleh .

3- Soomka labada maalmood ee ciida .

4-Soomka maalmaha hilbo wadhada (Ayyaamu tashriiq) (11-12-13).

5-Soomka sanadkoo dhan.

Waxa sunnaa in uu is raaciyo qofku qallaha waxa kale oo sunna in uu u dagdago isla maalinka ka danbeeya ciida mana banana in uu dib dhigo qallah illaa ramadaan kale laga gaadhayo haduu dib dhigo se cudurdaar la,aan laasim kuma aha soomkii badnaa oo dhan laakiin waa ku danbaabaya.

### Sakada Fidriga

Waxay ku waajibaysaa qofka ay cadcedu u dhacdey maalinkii uadanbeeyay ee ramadaan isagoo muslim ah isagoo haysta wax dheeri ka ah

waxa uu quuto maalinka ciida iyo habeenkeeda sidoo kale dheeri ka ah quutka ciyaalkiisa iyo baahiya gaarkaa,in ilmaha caloosha ku jira laga bixiyaa waa mustaxab.

### Xikmadda laga leeyahay

1-daahirin ayeey utahay qofkii soomanaa.

2-masaakiinta ayaa laga ilaalinaya baryada maalinkaa ciida dhexdeeda.

### Goorta la bixinayo

1-Xiligay gudaysaa waa ciida ka hor maalin ama laba maalin.

2- Xiligay mustaxab tahayna waa salaada ciida ka hor bacda salaada subax.

3-Waqtigay xaaran tahayna waa bacda salaada ciida kadib.

### Qdarkeeda la bixinayo

Saac cunto ah oo ah waxay quutaan dadka baladkaa dagani ku gudimayso in lagu bixiyo lacag(qadarka saaacu waa laba kiilo iyo afartan garaam oo bur ah).

### Salaada ciida

Waa fardu cayn qof kaste waxa la tukanayaa cadceedu markey kor noqoto in waran leeg una baydho bartamah,lama qallaynayo hadii ay baxdo, waxa sunna in lagu oogo meel banaan ah, oo ka baxsan guryaha, way ku banaantahay masaajidada,sidoo kale in uu cuno timir kala dhiman ciida ka hor,oo uu isnadiifiyo oo is udgiyo kuna labisto dharkiisa kuwa u wacan oo ka tago wado kana noqdo bid aan ahayn kii hore, dhib maleh in la isku tahniyadeeyo,waxa sunnaa takbiirta sii daysan habeemka ciida iyo salaad kaste dabadeed illaa cadceed dhaca maalinka ciida qaabkeeduna waa in uu takbiirto sifadeeduna waa laba rakadood oo takbiiranayo ta hore kadib takbiirta xidxidhashada ta labaadna ka hor akhrinta shan aan ahayn ta uu ku soo toosay.

Вақф барои Аллоҳ  
таъоло

# فقه الصيام

## FAHANKA SOOMKA

DR: Haytham sarhan

Bare wax ka dhiga xaramka masjidka nabiga